
# Akhbaarta Aasaasiga ah ee Kireystayaasha

Basic Information for Tenants

## Guri Raadinta

- Marna ha kiraysan guri aadan soo arag. Hubi inaad eegto guriga aad doonayso inaad kireysanayso. Ha u ogolaan in qolada gurigu ku tusto "guri la mid ah." Kaaga.

- **Dalbashada iyo Khidmadaha Codsiga**
  Ha bixin khidmada codsiga hadii aysan u badnayn inaad guriga heli doonto. Hadii ay jiraan wax akhbaar xun ah oo ku saabsan taariikhdaada guri kireysiga ama kiridhidka, u sheeg qolada guriga ka hor inta aadan khidmada bixin. Inaad u sheegto ma aha qolada guriga akhbaarta qaarkeed. Tusaale ahaan, ma aha inaad u sheegto qolada guriga dambiyo aad horey u gashay ama guri ka saaridyo hore oo lagaa tirtiray (masaxay).

  Ka hor inta aysan qoladu guriga qaban khidmada codsiga, waa inay ku siiyaan nuqul qoran oo ah waxyaabaha ay ka rabaan kireystaha (shuruudaha xulashada).

  Qolada gurigu ma sarifan karto wax ka badan 1 khidmad codsi markiiba ee guri. Sharcigu waxa uu dhigayaa in lacagtaadu kuu soo noqoto hadii guriga uu qaato qof kale oo codsaday hortaa.

  Ma aha in laguu diido guriga hadii aad ka soo baxdo shuruudaha qoran ee qolada guriga. Hadii laguu diido waxa ay noqon kartaa taasi astaan takoor. Eeg warqadayada xogta aruursan ee *Heyb Sooca Guryaha*.

  Hayso dhamaan warqadahaaga ku saabsan codsiga kana dacawee maxkamada qaamaha yaryar hadii qolada gurigu ay jabiso sharcigan. Qolada gurigu waa inay ku siisaa lacag siyaado ah adiga hadii ay jabiyaan sharcigan. Eeg warqadayda xogta aruursan ee *Maxkamadaha Dacwadaha Madaniga*.

- **Soo Baarida Kiraystaha iyo Khidmadaha soo Baarida Kiraystaha**
  Hadii qolada gurigu ay isticmaasho warbixinada hay'adaha soo baara kireystayaasha, waa khasab inay kuu sheegaan magaca, ciwaanka, lambarka telefanka ee hay'ada ka hor inta aysan qaadin khidmad codsiga. Waa inay ku siiyaan rasiidka khidmada. Hadii aysan ku siin, waydii inay ku siiyaan.

  Qolada gurigu kaagama qaadi karto khidmad si ay uga helaan warbixin hay'ad baarid sameysa hadii wax guri ahi uusan diyaar ahayn.

Hadii lagu diido iyadoo sababtu tahay akhbaar ku jira warbixinta baarida kireystaha, la xiriir hay'ada baarida kireystaha. Ka hel nuqul warbixintooda. Waxa aad xaq u leedahay inaad saxdo wixii khalad ah. Eeg warqada xogta aruursan ee *Soo Baarida Kireystaha*.

- **Khidmadaha Kale**
  Iska ilaali inaad bixiso dabaajiga guriga **ka hor** inta aan guri in lagu siiyo aan laguu ansaxin aadana saxiixin liiska. Waa ay adkaan kartaa in dabaajigu kuu soo noqoo hadii codsigaaga la diido.

  Qaar ka mid qolyaha guryahu waxa ay dadka waydiistaan lacag "sii qabashada" guriga ah ka hor inta aan la saxiixin heshiiska liiska guri degida. Tani waa ay ka duwan tahay dabaajiga caadiga ah. Qolo guri lahi ma qaadi karaan wax dabaaji ah oo "liiska ka sii horeeya" la'aanta heshiis qoraal ah. Heshiiskaasina waa inuu kuu sheegaa sida iyo kolka ay lacagtu kuugu soo noqon. Hadii aad guriga kireysato, qolada gurigu waa inay lacagta aad ku bixisay dabaajiga liiska ka horeeya ay ku aadiyaan kirada.

- **Waxa aad xaq u leedahay in laguula dhaqmo si sinaan iyo cadaalad ah.**
  Waxaad xaq u leedahay in si sinaan ah laguula dhaqmo. Waa sharci-darro in qolada gurigu ay ku diidaan sababtoo ah inaad tahay qofka mid ah dadka midabka madow leh ama qof naafo ah, qof qaata cayr ama qof ilmo haysta iyo waxyaabo kale.

  Hadii aad ka shakido in lagu takoorayo, wac xafiiska gargaarka sharciyada (legal aid) ee 1-(877) 696-6529. Eeg warqadayda xogta aruursan ee, *Heyb Sooca Guryaha*.

  Eeg warqadayda xogta aruursan ee, *Guri Raadinta*.

## Saxiixida Liiska

- Qolada gurigu waa khasab inay adeegsato liis qoraal ah hadii ay sartu leedahay 12 guri ama ka badan.

- Akhri liiska ka hor inta aadan saxiixin! Qolada gurigu waa inay kaa siisaa nuqul liiska.

- Ha saxiixin liiska ilaa iyo inta aad ka fatashayso guriga. Ka samee qoraal wax walba oo wasakh ah, halaysan ama jaban. Waydii qolada guriga inay saxiixaan qoraalka ayna ogolaadaan inay hagaajiyaan waxa halaysan. Nuqul meel ka dhigo qoraalkaa.

  Sidoo kale waa ra'yi wacan inaad sawiro ka qaado kuwaa iyo wixii kale ee dhibaato ah ee aad la kulanto ka dib kolka aad guriga soo degto. U dir qolada gurigaaga iyadoo ay weheliso warqad codsanaysa hagaajinta. Nuqul (copy) kala har.



- Waa aad kula gorgor tami kartaa qolada guriga inay bedelaan liiska ka hor inta aadan saxiixin. Waa inaad labadiinuba aad saxiixdaan meesha ku xigta wax walba oo la bedelay.

- Qaarka mid ah liiska waxaa ku jira waxyaabo sharci-darro ah. Ma aha inaad u hogaansanto qaybahaa liiska hadii aad saxiixdo. Tusaale ahaan, sharcigu waxa uu yiraa qolayaha guryahu kama dhigi karaan in wixii halaaba ay mas'uul ka noqdaan kireystayaashu. Hadii aad qabto su'aalo ku saabsan in liisku uu sharciga waafaqsan yahay iyo in kale, la hadal qareen ka hor ama ka dib kolka aad saxiixdo.

- Qolada guriga ama maamulahu waa khasab inay ku siiyaan ciwaankooda ganacsi ee wadada ee warqadaha loogu soo hagaajiyo. Santuukhyada Boostada (P.O. Box) arrintaa kuma filna. Haddii uu ganacsigu guuro, waa khasab inay kuu sheegaan ciwaanka cusub.

- Kolka mudadda liiskaagu ay dhamaato (oo inta badan ah 1 sanno), waa inaad saxiixdaa liis cusub, hadii uusan liiskaagu iskii isu cusboonaysiin. Laakiin hubi arrintaa. Qaar ka mid ah liisaska iskood isu cusboonaysiiya kaliya waxay iskood isugu cusboonaysiin qandaraasyo bil-bil ah.

  Hadii aadan saxiixin liis cusub, waxa aad guriga kiraysanaysaa bil-bil kaliya qolada guriguna waa ay ku waysiisan kartaa inaad ka baxdo iyagoo ku siinaya ogaysiis hal bil iyo hal maalin ah.

  Mar walba waxaa fiican inaad hesho liis, LAAKIIN, hadii aad guri ku kireysato heshiis afka kaliya uun ah, taa waxaa loo arkaa inay tahay heshiis bil-bil ah. Hadii ay khasab kugu noqoto mar ay noqotaba mar inaad maxkamad aado, waxaad u baahan tahay inaad cadeyso inaad kiro bixiso, kolka hel xafidana rasiidyada!

## Dagaal Qoyska Dhexdiisa ah iyo Ka Bixida Liiska



***Hadii aadan amaan ahayn iyadoo sababtu tahay dagaal qoyska dhexdiisa ah wac: 1 (866) 223-1111.***

***Hadii aadan amaan ahayn iyadoo sababtu tahay xoogid laguu geystay wac: 1 (800) 656-4673.***

Haddii adiga ama qof aad la nooshahay uu yahay dhibane dagaal qoyska dhexdiisa ah dhib ku soo gaaray, horey waa aad u joojin kartaa heshiiska (lease) guriga aad ku degan tahay haddii aad is-leedahay in dhibku uu sii socon doono haddii aad sii joogto. Taa waxaa ku jira ilaalaysiga ama dambiyadda galmadda fara-xumeynta ah. LAAKIIN, hadii aad rabo inaad liiska joojiso inta uusan dhamaan waqtigiisu waxaa jira waxyaabo ay **khasab** tahay inaad sameyso:

- waa inaad ka heshaa nuqul **mid** ka mid ah qoraaladan:
  - **Amarka Amaan helida** (OFP).

  - **Amar la Soo Xiriirid la'aanta ah ama Amarka la soo Xiriirid La'aanta ee Dagaalka Qoyska Dhexdiisa ah haor (DANCO).**

  - **Wax u saxiixay mas'uul maxkamadeed** oo sheegaya inaad tahay dhibane dhib ka soo gaaray, dagaal qoyska dhexdiisa ah, dabagalid, ama faraxumeyn galo oo dambi ah.


- **Wax ay saxiixday degmo, gobol, hay'adaha sharci ilaalinta ee qabaa'ilka,** oo sheegaya inaad tahay dhibane dhib ka soo gaaray, dagaal qoyska dhexdiisa ah, dabagalid, ama faraxumeyn galo oo dambi ah.

- **Oraah ka timid "qolo sedexaad oo la aqoonsan yahay."** Qolada sedexaad ee la aqoonsan yahay waa daryeel-bixiye shati leh, la taliyaha dadka la xoogo, taakuleeyaha dadka lagu tacadiyo ee qoyska. Waxaa jira foom ay qolada sedexaad ee la aqoonsan yahay ay isticmaali karto si ay ugu qoraan oraahdooda. Foomkani waxa uu ku lifaaqsan yahay warqada xogta aruursan ee, *Dhibanayaasha Dagaal Qoyska Dhex Mara, Qashqashaadda, ama Fal Dambiyeedka La Xiriira Galmoodka: Xaqa Aad U Leedahay In Aad Ka Baxdo Heshiiska Kirada*.

  **IYO**

- Waa khasab inaad siiso qolada gurigaaga ogaysiis qoran ka hor inta aadan guurin. Nuqulna aad adigu naftaada uga sameysato. Sharcigu ma yiraa inta ay tahay mudada ogaysiiska ah ee lagaa rabo inaad bixiso laakiin waxaa inaad siiso qolada guriga mudadda ogaysiiska ee ugu badan ee aad siin kartaa. Ogaysiisku waa inuu yiraa:
  - in adiga ama qof kale oo gurigaaga ku nool uu ka baqayo inuu wax yeelo hada tacadiyahu
  - in aad u baahan tahay inaad liiska aad joojiso, iyo waqtiga aad doonayso in liisku joogsado. **Uma** baahnid inaad siiso 30 ama 60 cisho oo ogaysiis ah iyo
  - waxa aad doonayso in qolada gurigu ay ka yeesho wixii aad guriga uga tagtay.

Wali waa lagugu leeyahay kirada bisha aad joojiso liiska. Qolada gurigu waa ay qaadan karaan lacagtaada dabaajiga ah, laakiin uma baahnid inaad siiso wax kale qolada guriga si aad u guurto.



Khasab kugu ma aha inaad siiso qolada guriga wax faahfaahin ah oo ku saabsan tacadiga. Qolada gurigu xaq uma laha inay kaa hor istaagto inaad guurto. Qolada gurigaagu uma **sheegi karto** cid inaad tahay dhibane dagaal dhib ka soo gaaray mana siin karto cid wax akhbaar ah ah oo ku jirta ogaysiiskaaga qoran ama dukumiintiga ku lifaaqan hadii aadan siin adigu qolada guriga ogolaansho. Qolada gurigu kuguma **khasbi karto** inaad siiso magaca tacadi gaystaha ama dambi geystaha. Qolada gurigu waa ay ku waydiin karaan qofka, laakiin ma aha inaad u sheegto qolada gurigaaga hadii aad is leedahay amaan ma aha inaad qofka magacowdo ama hadii aadan aqoon qofka magaciisa.

Xataa hadii aadan sameyn waxyaabahaas oo dhan, wali waa aad guuri kartaa, laakiin waxaa dhici karta inaad u baahato inaad kirada bixiso ilaa inta qolada gurigu ay ka helayaan kireyste cusub.

Qolada gurigaagu guriga kaagama saari **karaan** uun sabab ah inaad ahaynd dhibane dagaal qoyska dhexdiisa ah, dabagalid, ama faraxumeyn galo oo dambi ah dhib ku soo gaaray.

Qaar ka mid ah sharciyadda dowladda dhexe waxa ay quseeyaan kiraystayaasha dagaal qoyska dhexdiisa ah uu ku dhaco haddii ay ku nool yihiin:

- Guryo dowladeed
- Guryaha kiradooda la kabo
- Guryaha Danyarta ee Kiridhidka Canshuurta Lagu Helo ama
- Guryaha Miyiga ee hay'adda  USDA

Wixii akhbaar ah ee kale ka eeg warqada xogta aruursan ee *Dhibanayaasha Dagaal Qoyska Dhex Mara, Qashqashaadda, ama Fal Dambiyeedka La Xiriira Galmoodka: Xaqa Aad U Leedahay In Aad Ka Baxdo Heshiiska Kirada*.

## Bixinta Kirada

- Mar walba ka hel rasiid kirada aad bixiso. Qolada gurigu waa inay kugu siiso 3-cisho gudaheed rasiidka kirada aad lacagta cadaanka ah ku bixiso. Rasiidka waa inay ku qornaadaan taariikhda, cadadka iyo saxiixa qolada guriga ama maamulaha. Khasab ma aha inuu noqodo rasiidku foom gaar ah.

- Liisaska intooda badan, kirada waxaa la iska rabaa in la bixiyo bisha kowdeeda. Qaar ka mid ah liisasku waxa ay leeyihiin wax la yiraa "mudadda sharfida." Hadii aadan ku bixin kiradaada waqtiga la rabi in la bixiyo, qolada gurigu waxa ay kugu soo dalici kartaa khidmad kiro la daahid ah ama waxa ay xareysan karaan dacwo guri ka saarid.

- Mar kasta kirada ku bixi waqtiga loogu talagalay in la bixiyo. Kiradaadu waa kharashka ugu muhiimsan kharashyada aad bixiso. Waligaa marna ha isku halayn in qolo guri ay kuu samrayso ayna kaa sugi kirada.



Liiska qorani waxa uu kuu sheegi kolka qolada guri ay kordhin karto kirada. Hadii aadan haysan liis qoran, kolkaa qolada gurigu waa ay kordhin karaan kirada hadii ay ku siiyaan ogaysiis qoraal ah oo ah bil iyo maalin.

## Hadii uu qof kula Degan yahay

- Aad uga taxadar xulashada qofka kula degaya. Hadii qofka kula degani uusan bixin kirada, waa inaad adigu bixisaa. Hadii qofka kula degani uu liiska jabiyo, guriga waa lagaa saari karaa adiga.

- Hadii aad haysato liis qoraal ah, wuxuu oran karaa kuma dari kartid qof cusub liiska hadii aysan qolada gurigu oran waa hagaag arrintaasi ama aad ka hesho iyaga ogolaanshi qoran. Xataa la'aanta liis qoran, waa ra'yi wacan inaad hesho ogolaanshaha qolada guriga.

- Hadii korontada magacaaga ay ku qoran tahay, shirkada korontadu waxa ay kugu soo dalici kartaa lacagta biilka oo dhan. Shirkadaha korontadu waxay isku dayaan inay la socdaan dagaanada dadka iyo ciwaanadoodii hore. Hadii aad guurto waxaa dhici kartaa inay kugu soo dalacaan lacagta adeega mar dambe kolka aad degto gurigaaga cusub.

Hadii shirkad koronto ay kugu soo dalacdo biil qof kale magaciisa ah, aadna marna adigu horey u ogolaan inaad bixiso, wac gargaarka sharciga (legal aid). Sidoo kale, wac gargaarka sharci (legal aid) hadii shirkad koronto ay kugu soo dalacdo adeeg ay qolada gurigaagu horey u ogolaatay inay bixiso. Waxaa dhici in laga maarmi waayo inaad tusto liis cadeynaya cida bixinaysa kharashaadka korontada.

- Hadii aad guurto, hubi in qolada gurigu ay qoraal ahaan ku ogolaato inay adiga liiska kaa saarto. Hadii kale wali waa lagugu soo dalici karaa kirada. Hubi in magacaaga la saaro korontada iyana.
- Eeg warqadayada xogta aruursan ee, *Hoy Wadaag*.

## Xog Xafidida

- Qolada gurigu waxa ay u soo geli karaan gurigaaga arrimo la xiriira hawl ama xaalad degddeg ah.
- Hadii xaalad degdeg ahi aysan jirin, qoladda gurigu waa khasab inay bixiso ugu yaraan 24-saac oo ogaysiis ah ka hor inta aysan guriga soo gelin. Kaliya, waxay guriga soo geli karaan saacadaha u dhaxeeya 8:00 subaxnimo (am) ilaa iyo 8:00 fiidnimoo (am), haddi aadan adigu ogolaan waqti kale.



- Hadii qolada gurigu ay gurigaaga soo gasho iyagoon ku siin adiga ogaysiis marka hore, aadana adigu guriga joogin kolkaa, waa khasab inay kuu dhaafaan qoraal yar.
- Hadii qolada gurigu ay jabiso xeerkan, waxa aad ka dacweyn kartaa maxkamada Qaamaha yaryar (Conciliation Court) si ay lacagta kiradu kuugu soo noqoto iyo/ama lagaaga saamaxo liiskaaga. Waxaad kaloo ka codsan kartaa maxkamadda ganaax ah $500 mar kasta oo arritani ay dhacday. Eeg warqadayada Xogta aruursan ee *Maxkamadaha Dacwadaha Madaniga*.
- Khashkhashaada galmada ee gurayaha ee uu sameeyo qofka guriga leh, shaqaalaha guriga, maamulaha ama waardiyeyaashu waa sharci-darro. Eeg warqadayada xogta aruursan ee, *Khashkhashaada Galmada Mulkiilaha Gurigu uu Rabo*. Kolka qolada guriga ay soo gasho gurigaaga marmar badan ama la'aanta ogaysiis quman, taasi waxa ay noqon kartaa astaan khashkhashaad galmo ah. Wac gargaarka sharciyada (legal aid) hadii arrintaa aad ka walaacsan tahay.
- Eeg warqadayada xogta aruursan ee, *Qolada Guriga aan uga jiraa ma soo geli kartaa Gurigayga?*

## Hagaajinada

- Haddii xaalad degdeg ahi ay jirto wac qoladda guriga markiiba. Ha sugin. Haddii qoladda gurigu aysan soo jawaabin ama aysan degdeg wax uga qaban xaaladda, ka wac xafiiska gargaarka (legal aid) khadka ah 1-(877) 696-6529. Xaaladaha degdega ah waa kuwa waxyaabaha sida, koronto, ama biyo, ama kulayl la'aan ama musqul jaban ama ogaysiiska guriga inaan lagu noolaan karin ah. Waydii Falka Degdeg ah ee Maciinada Kiraystaha (Emergency Tenant Remedy Action). Eeg warqadayada xogta aruursan ee, *Dhibaatooyinka Dayactirka ee Degdegga Ah*.

- Hadii aysan xaaladu degdeg ahayn, u qor qolada guriga warqad ay ku qoran yihiin dhamaan dhibaatooyinka gurigu. Ku qor taariikhda nuqulna kala har. Hadii aysan wax uga qaban dhibka 14-cisho gudahood, wac xafiiska gargaarka sharciyada (legal aid) ka dibna waydi dacwadaha Kiro Rahmida ah. Dacwooyinka Kiro rahmida ah, kiradaada waxa aa u dhiibaysaa maxkamada. Maxkamadu waxa ay amri hagaajinada, waxa ayna kuu soo celin kartaa qaar ka mid ah kiradaada. Eeg warqadayada xogta aruursan ee, *Ka Helida Qolada Gurigu Inay Hagaajiso Wixii Halaysan*.

- Waxaad kaloo wici kartaa fatashada guryaha kirada ah ee magaalada. Fatashayaashu aad ayey u caawin karaan in la sameeyo hagaajinda. Wac xafiisyada fatashaada ee magaalada aad ku nooshahay si aad u ogaato inuu ka jiro barnaamij shatiyeynta kirada ah.

- Ha ka hayn lacagta kirada ah qolada guriga. Hana hagaajin wixii halaysan si aad ugu jarato kharaska hagaajinta kirada.

- Waa aad ka dacaweyn kartaa qolada gurigaaga Maxkamada Qaamaha yaryar (Conciliation Court) si ay lacag kaaga soo noqoto dhibaatooyinkii kaa soo gaaray guriga aad hagaagsanayn oo aad mudadda ku noolayd. Xataa waa aad dacaweyn kartaa ka dib kolka aad guurto, laakiin waxaa u baahan tahay cadeyn ah in qolada gurigu ay ogayd dhibaatada laakiin aysan hagaajin. Eeg warqadayada Xogta aruursan ee *Maxkamadaha Dacwadaha Madaniga*.

## Ka Xirashada iyo ka Goynta Adeega

- Sida kaliya ee qolada gurigu ay guri kaaga saari kartaa waa inay xareystaan dacwo maxkamadeed oo la yiraa guri ka saarid. Qolada gurigu ma bedeli karaan qufulka, ma rari karaan alaabtaada, ma goyn karaan korontada, ama ma ay samayn karaan wax kale si ay kuugu khasbaan inaad ka baxdo guriga iyagoon tagin maxkamada guryo ka saarida marka hore.

- Hadii guriga lagaa xirto, wac qolada guriga una sharax in guri ka xirashadu ay dambi tahay sida uu dhigayo Sharciga Minnespota ee Minnesota Statute 504B.225. hadii aysan kuu ogolaan inaad guriga dib ugu noqoto, wac bilayska. Hadii taasi shaqeyn waydo, wac xafiiska gargaarka sharciyada (legal aid) ee 1-(877) 696-6529.

  Waa aad ka xareysan kartaa kiis dacwo guri ka xirasho ah maxkamad si guriga dib laguugu oglaado. Hadii qolada gurigu ay guriga kaa xiratay ama ay korontadii kaa gooyeen ama ay si "laqdabo," ah ay u dhaqmeen waxa aad heli kartaa $500 ama ka badan oo lacag ah iyo waliba khidmada qareenka oo ay bixiyaan. Sidoo kale waxa aad ha dhow ka dacaweyn kartaa Maxkamada Qaamaha yaryar. Eeg warqadayada Xogta aruursan ee *Maxkamadaha Dacwadaha Madaniga*.

- Eeg warqadayada Xogta aruursan ee *Guri ka xirashada ama ka Goynta Biyaha iyo Korontadu waa Sharci-darro*.

## Guri Ka Saaritaanada

- Hadii guri lagaa saarayo, akhri warqada xogta aruursan ee *Guri ka Saarida*. Wac, xafiiska Gargaarka Sharciyada (legal aid) markiiba ee 1(877) 696-6529.

- Mulkiilaha gurigu waxa uu xareysan karaa dacwo guri ka saarid ah haddii aadan ku bixin kiradda waqtigii loogu talagalay. Mulkiilaha gurigu waa khasab inuu ku siiyo ogaysiis qoran 14-cisho ka hor inta uusan xareysan dacwadda guri ka saarida ah.


- Mulkiilaha gurigu waxa ay uu xareysan karaa dacwo guri ka saarid ah haddii aad sameyso wax uu heshiiska (lease) gurigu uu leeyahay ma aad sameyn karto, ama haddii aad guriga sii joogto ka dib kolkii lagu siiyey ogaysiis quman oo inaad guriga ka baxdo ah.

- Waa inaad hesho warqadaha maxkamada ugu yaraan 7-cisho ka hor waqtiga dacwada.

- **Tag maxkamada waqtigii laguu qabtay inaad tagto**, hadii kale waa lagaa guulaysan adigoon xataa aan helin fursan aad kula hadasho xaakimka. Tag maxkamada xataa hadii aad u baahan tahay in lagu siiyo waqtiga dheeraad ah oo aad ku guurto.

- Hadii lagaa guulaysto, aadana heshiis la gaari karin qolada guriga, waqtiga ugu badan ee maxkamadu ku siin karto si aad ugu guurtaa waa 7-cisho haddii dar-xumo ay jirto.

- Hadii lagugu leeyahay lacag kiro, waa khasab inaad lacagta aad maxkamada keento. Hadii lacagtan oo dhan aad maxkamada ka bixiso, guriga lagaama saari doono. Warqadaha maxkamada waxaa kaloo dhici karta in ay ku qoran yihiin cadadka khidmada dacwo xareysiga ee qolada guriga, hadii kale, wac maxkamada si aad u ogaato. Waa khasab inaad bixiso khidmada dacwo xareysiga iyo khidmada adeega ah, laakiin waxa aad codsan kartaa ilaa iyo 7-cisho inaad ku bixiso khidmada adeega.



- Hadii aad kirada sii hayso iyadoo sababtu tahay dhibaatooyinka hagaajin la'aan ah awgood, waa khasab inaad maxkamada aad keento dhamaan lacagta kirada oo cadaan ah, jeega idman (money order) ama jeega khasnajiga (cashier's check) ah. Uma aad baahnaan doontid khidmada la soo daahida iyo mida dacwo xareysiga inaad bixiso, waxa aad u baahnaan **doontaa** inaad ku dhex bixiso dhamaan kirada oo dhan maxkamada aadna cadeyso in qolada guriga aysan guriga waxa ka halaysan aysan hagaajin.

## Tirtirida

- Diiwaanka maxkamada ee kiiska guri ka saarida ahi waa mid cid walbaa arki karto kolka ugu horeeya ee la xareysto dacwad. Tani badanaa waa ka hor xataa inta aadan ogaan dacwada. Shirkadaha sameeya soo baarida dadka (shirakaha baaraha kireystaha) waxa ay soo sheegi karaan 7-sanno ama ka badan. Waa ay adkaan kartaa in diiwaanka maxkamadda la masaxo ama la 'tirtiro.' Haddii aad hesho in lagaa masaxo, shirkadaha soo baara kiraystaashu ma ay soo tabin karaan wixii hore. Qaar ka mid ah sharciyaddu waa la isbedelay 2024 taa oo ka dhigi tirtiridda dacwooyinka kuwa fudud.

- Kolka aad maxkamada u tagto dacwo guri ka saarid ah, waydiiso in maxkamaddu ay kaa tirtirto diiwaanka haddii
  - aad ku guulaysato kiiska, ama
  - haddii kiiska la buriyo sababtu si kasta ha noqotee, ama
  - haddii lagu dhameeyo waanwaan iyo heshiis

- Haddii lagaaga guulaysto maxkamad guri ka saarid ah, waxaa aad heli kartaa tirtirid taa ah 3-sanno ka dib in laga saaro guri ka saarida diiwaankaaga. Waxa aad u baahan tahay inaad ka xareysato codsi maxkamad (file a motion in court) si aad taa u sameyso. Waxaad kale oo aad xareysan kartaa codsi ah kiisas hore oo guri ka saarid ahaa oo diiwaankaaga ku jira oo kaa hor istaaga guri helid in lagaa masaxo. Kala xiriir xafiiska gargaaradda dhanka sharciyadda (legal aid) si uu kuu ah (877) 696-6529.

- Waxaad sidoo kale aad xaq u leedahay inaad ka siiso sharaxaad wixii guri ka saaritaano hore ah shirkadaha soo baarida kireystaha. Waa inay ku daraan sharaxaadaada (ilaa 100 eray) wixii warbixino ah ee ay diraan.

- Eeg warqadayada xogta aruursan ee *Tirtirada Guriga Ka Saarida*.

## Guurida

- Hadii aadan haysan liis qoraal ah, waxa ay u badan tahay inaad guriga u kireysanayso bil-bil. Qolada gurigu waxa ay ku waydiisan kartaa inaad ka guurto hadii ay ku siiyaan ogaysiis qoran oo ah 1 bil iyo hal maalin ah. Si kale hadii loo yiraa, hadii ay rabaan inaad ka guurto Luulyo 31, deeda, waa inay ku siiyaan ogaysiis Juun 30 keeda.

- Hadii aad haysato ogaysiis qoraal ah aadna doonayso inaad guurto, eeg liiskaaga si aad u aragto inta ay tahay mudadda ogaysiiska ah ee lagaa rabo inaad bixiso. Hadii aadan haysan liis, waa khasab inaad siiso ogaysiis **qoran** oo ah 1 bil iyo hal maalin oo aad ugu sheegayso qolada guriga inaad guurayso. Qolada gurigu waa khasab inay helaan ogaysiis waqtiga la rabo inay helaan. Ka la har nuqul ogaysiiska aad dirayso.




- Uma isticmaali kartid lacagta dabaajiga ah ee kaa taal kirada bisha guriga kuugu dambaysa. Kaliya waxa aad ka boodi kartaa bixinta kirada bisha guriga kuugu dambaysa hadii aad horey u sii bixisay kirada bishaa kolkii aad guriga soo dagaysay.

- **Guriga isagoo nadiif ah ka bax**. Qoladda guriga aad uga jirtaa waa inay sameyso fatashaadda guurida haddii aad ka dalbato. Waxaa aad xaq u leedahay inaad meesha joogto xilligaa. Waydiiso warqad saxiix leh oo oranaysa in gurigu uu gabi ahaanba nadiif ahaa aana waxna halaysnayn. Sawiro ka qaad haddii aad awoodo. Haddii aad dalbato fatashaadda guriga ka guurida ka dib ah, mulkiilaha gurigu waa inuu balanta fatashaadda ku qabtaa 5-cisho gudahood waqtiga aad guurayso.

- Hadii aad rabto inaad guriga ka guurto ka hor inta aan mudadda liisku dhamaan, la hadal qolada guriga markiiba. Waxaa dhici karta inay wuxuun kula furdaamiyaan, gaar ahaan, hadii aadan u heli.

- karin iyaga kireystayaal cusub. Hadii kale waxaa dhici karta inay khasab kugu noqoto inaad kirada bixiso ilaa iyo inta mudadda liisku ay ka dhamaanayso.

- Haddii ay noqoto inaad guurto sababta oo ah dhibaatooyin xagga dayarctir la'aanta guriga ah ama dhibaatooyin kale oo mulkiilaha khalad uu geystay ah, haysto cadeyn dhibaatooyinkaa ah. Sidoo kale hayso cadeyn ah waxa aad sameysay si aad uga hesho mulkiilaha guriga inuu wax ka qabto muskulooyinkaa. U dir warqad qolada guriga. Ka dib waa aad ku muduci kartaa in aysan ahayn inaad kiro bixiso ka dib kolka aad guurto.

- Hadii guri lagaa saaro ama aad guurto aadna qaar ka mid ah alaabtaada aad guriga uga tagto, Eeg warqadayada xogta aruursan ee *Dib U Helitaanka Hantidaada Ka Dib Marka Aad Guurto*

## Lacagta Dabaajiga ah

- Marba hadii aad siiso qolada guriga ciwaankaaga boostada ee cusub, waa inay kuugu soo celiyaan dabaajigaaga 21-cisho gudahood kolka aad ka guurto. Hadii aysan kuu soo celin gabi ahaanba dabaajigaaga, waa inay kuu soo diraan warqad sharxaysa sababta. Hadii gurigu uu noqdo guri aan deegaan ku haboonayn, waxa aad ka codsan kartaa in dabaajigaaga laguugu soo celiyo 5-cisho gudahood.

- Dabaajiga dul-saarkiisu waa 1%. ee 1%, dabaajiyda $500 waxa ay kasbadaan dulsaar $5 sannadkii.

- Qolada gurigu waxa ay kaa jaran kartaa uun wixii la jabiyo lacagtooda, kirada aan la bixin iyo khidmadaha aad ku heshiiseen (sida lacagaha nadiifinta wixii alaab ah ee iyagoo wasakhaysan aad ka tago, lacagta furayaasha dhuma, iwm.)

  Qolada gurigu kuguma soo dalaci karto adiga wax lacag ah oo ku saabsan "duugowga caadiga ah ee guriga." Ma ay lahaan karaan wax ay khasab kaaga jarayaan oo la xiriira duugowga caadiga ah ee alaabta sida lacag ay kaaga jaraan dhaqida rooga ama darbi rinjiyeynta.



- Hadi qolada gurigu kuu soo celin waydo dabaajigaaga, waxa aad ka dacaweyn kartaa maxkamada Qaamaha yaryar (Conciliation Court). Eeg warqadayada Xogta aruursan ee *Lacagta Keydka Ee Kirada* iyo *Maxkamadaha Dacwadaha Madaniga*.

*Xog Urursan oo ku saabsan macluumaadka sharciga MA AHA talo xagga sharciga. La tasho qareen.* *Ha isticmaalaan xogtan urursan haddi ay 1 sano ka soo wareegtay xilligii la daabacay. Weydiiso xogtii ugu dambeysay, liiska xogta urursan, ama aad ku hesho habab kale.*

**© 2026 Minnesota Legal Services Coalition. Qoraalkan waa la sii badin karaa waxaana loo adeegsan karaa oo kaliya hab shaqsi ah iyo waxbarasho kaliya. Xuquuqda kale waa mid la dhawray. Ogeysiiskan waa inuu la socdaa nuqul kasta oo la sii daabaco. Dib u daabicidda, sii qeybinta, iyo in loo isticmaalo hab ganacsi ah waa mid si adag loo mamnuucay.**